

Warbixin cusub oo ku saabsan internet [bredband]


Qofka adigoo kale ah oo ku nool guryaha shirkadda [Guryaha shirkadda [Sandvikenhus fastigheter] ayaa warqadaan loo soo diray.

Shirkadda [Sandviken Energi] waxay bilihii nofeembar/diseembar la wareegi doonta maaraynta shabakada internet [bredband] ee Guryaha shirkadda [Sandvikenhus fastigheter]. Toddobaadka 49:aad ayaan shabakada internet [bredband] ee cusub ku rakibi doonaan guryaha shirkadda [Sandvikenhus fastigheter] badidood. Hoos ku aqriso sida ay ku saamayn doonto.

Rakibaadda shabakada internet [bredband] ee cusub

Hanti ma guurtada aad degan tahay, ayaa shabakada internet [bredband] cusub, lagu rakibi doonaa laga bilaabo isniin 4 diseembar ilaa khamiis 7 diseembar, ku beegan toddobaadka 49:aad.

Googta gacanta lagu hayo hawlaha rakibaadda, waxaa la joojin doona adeegga internetka ee aad imminka haysato, ilaa aad heshiis cusub ku saabsan adeegga [bredband] ka gasho internet. Qaabka heshiiska adeegga loo galo, ka aqriso **"Adigoo adeegsanaayo ku dhaqaaqa hawlaha" Kom igång med dina tjänster i tjänsteportalen** ee ku qoran bogga ku xiga. Adeegga [Kabel-TV] ee shirkadda [ComHem] saamayn kuma yeelan doonto shabakada cusub. Sidii beri hore ayaa adeegga telefiishanka loogu heli kara guryaha. Qofka aan adeegsan adeegga internet [bredband] ee laga helo guryaha shirkadda [Sandvikenhus internet] saamayn kuma yeelan doonto joojintaas.



Masawirka kor kaaga muuqda: Galka adeegga [tjänsteportalen] adeegan ayaa kaaga muuqan doono. Aqal-kireystaha shirkadda [Sandvikenhus] ayaa adeegga noocaan ee cusub adeegsan kara, sida internetka xawaaraha ah ilaa 100Mbit/s iyo telefishanka laga helo shabakada internet [bredband] (IPTV).

Adeegyadaada ka qabso [tjänsteportalen]

Adegga Internet [bredband] oo aad berri hore haysan jirtay, kugu ma shaqayn doono shabakada internet [bredband] ee cusub. Sidaas darteed, waa inaad heshiis adeeg cusub la gasha Shirkadda [Sandviken Energi], adigoo adeegsanaayo [tjänsteportal]. Kaddib ayaa internet ku isticmaali karta. [Tjänsteportalen] hab autamatiik ayuu kugu soo ifbixi doonaa marka ugu horeeyso ee aad internetka isku xirto, adigoo adeegsanaayo shabakada internet [bredband] ee cusub. Adigoo adeegsanaayo [tjänsteportalen] ay heshiisyada adeegyada internet [bredband], telefiishanka IPTV iyo taleefan [IP-telefoni] geli karta.

Sidatan sameey:

- Markii aad gurigaaga ku sugan tahay gal internet [bredband], adigoo fiilo ama wifi routerka adeegsanaayo (waxaad kaloo ku isticmaali karta routerka fiilo la'aanta shaqeyya, tab ama mobaylkaaga).
- Gal weebka, kaddib waxaa toos kugu soo ifbixi doono [tjänsteportal] shirkadda [Sandviken Energi].
- Macaamiil ahaan iska diiwan geli, kaddib dooro bixiyaha adeegga iyo nooca adeegga aad doonayso. Ama waxaad adeegga toos ugu dalban karta shirkadda arrinta ay khuseeyso. Faahfaahinta xiriirka bixiyeyaasha adeegyada waxaad ka heleysa weebka shirkadda arrinta ay khuseeyso (laga bilaabo toddobaadka 49).
- Imminka waad dhamaysay hawshii! Ku soo-dhowoow shabakada internet [bredband] ee cusub, taasoo ku siin doonto fursad aad ku hesho tiro adeegyada internet [bredband] oo xawarahooda aad u dhaqsi badan ilaa 1000 Mbit/s!

Kaddib markii aad isku xirto haddii dhibaato aad kala kulanto, waxaanu ka codsanayna in marka hore aad la xiriirto shirkadda aad adeegyada ka dalbatay. Tan kale haddii aad [tjänsteportalen] ka aqrisato "Su'aallo iyo jawaab" waxaad heleysa jawaabta su'aashaada.

Haddii aadan geli karin [tjänsteportalen] ama su'aallo xiriir la leh warbixinta warqadda ku qoran, kala xiriir Shirkadda [Sandviken Energi], talayfan 026-24 16 00 ama emil u dir support@sandvikenenergi.se.

Warbixin dheeraad waxaad ka aqrisan karta sandvikenenergi.se/stadsnat.

Naga guddoon salaan wacan

Shirkadda [Sandviken Energi] AB